

111

— 890 —

Qodobka 436aad

Ka hortagga afada deynqabaha

Uma bannaana afada deynqabaha ee la nool inay oogto ka hortag ku saabsan xoolaha guurtada ah ee lagu qabtay gurigiisa, haddii laga qebo xoolaha ku saabsan Meherka ama xoolaha ay ku caddeyso qo-qoqo leh taariikh sugan in ay lahaatay guurka ka hor ama ay ku heshay qo-qoqo ama dhaxal sababtiisu tahay dhimasho.

BAABKA AFARAAD

JOOJINTA TILLAABOYINKA FULINTA IYO DHICIDDOODA

Qodobka 437aad

Xaadiidaada Joojinta

Ma bannaana joojinta fulitaanka khasabka ah Garsooraha amar la'aantii haddii uusan qaybinta nuunka sheegin si taas khilaafsan.

Qodobka 438aad

Joojinta fulinta ka hortag daraadeed

Haddii la keeno ka hortagga fulitaanka si waafaqsan qodobka 432 iyo wixii ka dambeeya, lana helo astaab xoog leh, Garsooraha waxaa u bannaan in joojiyo tillaabooyinka markii uu soo warsado dhinacyada midkood oo ay gogo dammaan wata ama la'aanteed.

Garsooruhu wu joojinayaa qaybinta waxa ka soo baxa fulinta dhammaantood ama markood haddii ay dhacdo dood ka mid ah ku wa lagu sheegay Qodobka 376.

Garsooruhu go'aan buu ka soo saarayaa doodda kaddib markii uu dhinacyada chegeto.

Waxaa u bannaan Garsooraha xaaladaha degdegga ah in uu soo saaro amar uu ku joojiyo tillaabooyinka isagoo u xaddidaya fadhi ay isugu imaanayaan dhinacyadu, iuna go'aan ku gaaro fadhiga.

Qodobka 439aad

Waxyaabaha ka dhalanaya joojinta

Haddii la joojiyo tillaabooyinka ma bannaana in lagu kaco tallaabo kasta oo fulaan ah haddii aan Garsooruhu amrin sidaas si ka duwan.

— 891 —

Qodobka 440aad
Dhaqaajinta Dacwadda

Dacwadda waa in lagu dhaqaajiyaan arji muddada go'an ee uu qabtay Garsooraha, ayadoo ka dambeynaysa mar kastaba lix bilood laga billaabo maalinta xukunka darajada koo'waad uu noqday dhammaad; iyo ogeysiinta xukunka racfaanka ee diidaya ka hortagga.

Qodobka 441aad
Ka noqoshada

Dacwadda fulinta way dhacaysaa, haddii ka hor baarinta gadidda xaraaska ah, deynlaha xoolaha loo qabtay ama deynlayaasha socda dhexgalay ee qaba warqadda leh xoogga fulinta, ay ka noqdaan warqadaha fulinta.

Kaddib gadidda, dacwadda fulinta wey dhacaysaa haddii dhammaan deynlayaasha ka qeybgalay ay ka noqdaan warqadaha fulinta.

Qodobka 442aad
Dacdarada Dhinacyada

Xaaladaha lagu caddeeyey qaamuunka ka sokow, dacwadda fulinta wey dhacaysaa marka dhinacyada ayna dhaqaajin ama ayna hor ugu wadin muddada go'an ee uu xaddiday qaamuunka ama Garsooraha.

Dhicidda waa mid qaamuuni ah, waxaana ku caddeynaya go'aan Garsooraha xataa haddii aan la weydiisan.

Qodobka 443aad
Ka maqaashaha fadhiga

Haddii dacwadda fulinta dhexdeeda dhammaan dhinacyadu ka maqaadaan fadhiga, Garsooruhu wuxuu qabanayaa fadhi kale, laaliyuhuna wuxuu ogeysiinayaa dhinacyada.

Haddii dhinacyadu imaan waayaan fadhiga cusub, Garsooruhu wuxuu go'aan ku caddeynayaa dhicidda dacwadda fulinta.

Qodobka 444aad

Waxyaabaha ka dhalanaya dhicidda dacwadda

Haddii dacwaddu ay dhacdo ka hor baarinta gadidda xaraaska ah, wax alla wixii tallaabo oo la qaaday waxay noqonayaan wax kama jiraan; haddiise dhicidda timaado kaddib baarinta gadidda xaraaska ah, lacagta ka soo baxda gadidda waxaa loo dhiibayaa deynqabaha.

Haddii fulintu ku saabsan tahay maguurto, Garsooruhu go'aanka uu ku caddeynayo dhicidda, ayuu ku amrayaa tirtiridda diiwaangaha qabashada. Amrakaasna wuxuu leeyahay xoog fulitaan xagga tirtiridda.

Marka ay dhacdo dacwadda, Xeer Ilaaliyuhu wuxuu u keenaya deynqabaha xisaabta, ayadoo lagala doodayo laguna xiraayo garsooraha hortiiisa.

Kharajka dacwadda dhacday wuxuu saaran yahay dhinaca hore u dhiibay.